



## Foomka Guriyaynta

Foomkan waxaa isticmaali kara qoysaska ay haysato hoy la'aan, guri ku meel gaar ah degan, ama aan haysan dukumentiga ciwaanka ee looga baahan yahay degaankooda caadiga ah. Xaqiijinta ciwaanka ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo u-qalmitaanka barnaamijyada dugsiga barbaarinta iyo daryeelka carruurta ee ay bixiso Magaalada Seattle. Seattle waa magaalo soo dhaweyn leh maxaa yeelay waxaan aaminsanahay ka mid noqoshada iyo sinnaanta. Shaqaalaha magaaladu ma waydiiyaan xaalada muwaadinimada waxayna u adeegaan dhamaan dadka deegaanka iyadoon loo eegayn xaaladooda sharciyeed. Soo galootiga iyo qaxootiga halkan waa lagu soo dhaweynayaa.

Fadlan calaamadee hal ikhtiyaar oo hoose oo raac tilmaamaha.

☐ Waxaan ku jirnaa hoy ku meel gaar ah. Soo gudbi foomkan iyo warqadda hoyga.

Fadlan soo gudbi warqad ka socota xarunta hoyga oo ay ku qoran yihiin magacaaga iyo cinwaanka hoyga ama cinwaanka boostada ee qarsoodiga ah ee ku yaal warqadda. Uma baahnid inaad soo gudbiso foomka dhaarta guriyeynta, kaliya warqadda shaqaalaha hoyga ayaa loo baahan yahay. Shaqaalaha hoyga waxay soo diri karaan iimayl bedelka warqadda haddii loo baahdo.

☐ Waxaan ula joognaa qof si ku meel gaar ah. Soo gudbi foomkan iyo hal dukumeenti.

Fadlan weydiiso martigeliyaha inuu buuxiyo qaybtan oo uu soo gudbiyo hal dukumeenti oo cinwaankoodu ku yaal. Macluumaadkan lalama wadaagi doono cid aan ahayn DEEL si lo xaqiijiyo u-qalmitaanka barnaamijka.

Magaca martida loo yahay	
Ciwaanka martida loo yahay	
Magaalada martida loo yahay, Gobolka, Zip	
Saxiixa Martigeliyaha	
Taariikhda Saxiixa Martigeliyaha	

Martigeliyaha: fadlan soo raaci hal (1) dukumeenti liiskan hoose oo wata ciwaanka:

- Biilasha Tamarta (gaaska, biyaha, qashinka, nalka, Cable, telefoonka)
- Caymiska guriga ama kiraystaha
- Dukumiintiyada amaahda guryaha
- Caymiska caafimaadka ama gaariga
- Dukumeentiga dheefaha (SSI, stub, DSHS, iwm.)
- Bayaanka bangiga ama kaarka deynta
- Biilasha kale

☐ Waxaan deganahay baabuur, motel ama meel kale oo ku meel gaar ah/meel joogsi oo la dhigo. Soo gudbi foomkan.

Fadlan hoos ku qor sharraxaad kooban oo ku saabsan xaaladdaada guri.

☐ Nama haysato guri la'aan laakiin ma awoodno inaan bixino dukumeenti cinwaankayaga ah. Soo gudbi foomkan iyo dhammaan dukumeentiyada aad awoodid.

Fadlan soo gudbi dukumeenti kasta oo aad awooddo oo ku soo dar sharraxaada hoose. Waxaa laga yaabaa in shaqaalaha DEEL ay kula soo xiriiraan si ay kagala hadlaan fursadaha ku saleysan xaaladdaada.

Sharaxaad:

Magaca Waalidka/Masuulka:	
Saxiixa Waalidka/Masuulka:	
Taariikhda:	